

# Social Media Messages for Wildfire Smoke

## Twitter

The following messages are available for posting to your local health agency's Twitter feed. All posts are 140 or fewer characters.

In addition to the suggestions below, the Centers for Disease Control and Prevention's [@CDCReady](#) and [@CDCEmergency](#) feeds can be retweeted as relevant information and links are tweeted.

## Tweets

#Wildfires wuxuu saameynayaa tayada hawada ee [insert region]:  
<http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Ma jirtaa hawo carceero/ciir leh? Fiiri Qiyaasta Tayada Hawada ee DEQ ka hor inta aadan bannaanka aadin: <http://oregonsmoke.blogspot.com/> #wildfires

Isticmaal #wildfires si aad u hesho macluumaadkii u dambeeyay ee dabka kaynta ama fiiri <http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Dadka u nugul #wildfires waa in ay yareeyaan hawlaha bannaanka laga qabanayo.  
<http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Cab biyo aad u badan! In biyo ku filan jirka ku jiraan waxay yaraysaa saameynta caafimaad ee uu yeesho #wildfire smoke.

Badbaado kaga sugnow #wildfire smoke. Booqo <http://oregonsmoke.blogspot.com/>

## Facebook

Benefits to Facebook postings is that conversations can take place among fans (although this needs moderation).

All of the above tweets can be cross-posted as Facebook messages. However, the following suggestions have images and links that can also be posted. For more suggestions, visit the Centers for Disease Control and Prevention's Facebook page at <https://www.facebook.com/cdcemergency> to repost useful links, webpages, photos, and tips.

## Facebook posts

Dabka kaynta lama saadaalin karin wuxuuna si dhakhso ah qiiq ugu diri karaa bulshada Oregon. Qiyaasta Tayada Hawada ee DEQ (AQI) waa qalab midab leh oo muujiya heerarka hawada wasakhda ah. Midabka cagaarku wuxuu ka dhigan yahay wanaagsan, midabka jaalaha ah wuxuu ka dhigan yahay dhexdhexaad, midabka liintu'orange'

wuxuu ka dhigan in aanu caafimaad u lahayn kooxaha u nugul qiiqa, iyada oo midabka guduudka/casaanka ahi uu ka dhigan in aanu caafimaad u lahayn kooxada oo dhan.

<http://www.deq.state.or.us/aqi/index.aspx>

Ma rabtaa marmarsiiyo aadan bannaanka guriga uga shaqayn? Marka hawada qiiqa leh ay weli jirto, iska ilaali hawsha adag ee bannaanka. Heerka tayada hawada ee bulshadaada ka ogow Barta Internet-ka ee Qiiqa Oregon 'Oregon Smoke Blog':

<http://oregonsmoke.blogspot.com/>.

Si aad naftaada iyo ta qoyskaaga uga ilaaliso qiiqa dabka kaynta, yaree hawlaha bannaanka laga qabanayo wakhtiyada lagu jiro tayada hawada oo liidata. Macluumaadkii ugu dambeeyey ka fiiri Barta Internet-ka ee Qiiqa Oregon 'Oregon Smoke blog':

<http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Heerarka qiiqa ee sareeyaa waxay saameyn caafimaad oo halis ah ku yeelan karaan caafimaadka. Dadka qaba cudurka neef mareenka ama cudurka wadnaha, dadka waayeelka ah, iyo carruurta waa in ay joogaan gudaha isla markaana la xiriiraan daryeel bixiyahooda caafimaad haddii aad jiradaan. Macluumaadkii ugu dambeeyey ka fiiri Barta Internet-ka ee Qiiqa Oregon 'Oregon Smoke blog': <http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Bannaanku ma leeyahay carceero/ciir? Ma jirtaa dhuun cuncun leh? Dadka ku nool meelaha qiiqa leh waa in ay cabaan biyo aad u badan. In biyo ku filan jirka ku jiraan waxay yaraysaa qiiqa hoos u gali kara sambabadaada.

Macluumaadkii ugu dambeeyey ka fiiri Barta Internet-ka ee Qiiqa Oregon 'Oregon Smoke blog': <http://oregonsmoke.blogspot.com/>

Ma baaskiil/bushkuleeti ayaad shaqada ku aadaa? Si loo yareeyo soo gaarista hawada qiiqa leh dabka kaynta, dadka qaata baaskiilku/bushkuleetigu waa in ay iska ilaaliyaan raacida adag isla markaana biyo ku filani jirkooda ku jiraan. Tixgelin sii qaadashada gaadiidka daweynaha.

Macluumaadkii ugu dambeeyey ka fiiri Barta Internet-ka ee Qiiqa Oregon 'Oregon Smoke blog': <http://oregonsmoke.blogspot.com/>